



# Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Maine

# 51 State House Station, Augusta, ME 04333-0051

Goobta deegaan: 19 Union Street, Augusta, ME 04330

Tel (207) 624-6290 □ Fakis (207) 624-8729 □ TTY: Maine Relay 711

[www.maine.gov/mhrc](http://www.maine.gov/mhrc)

**Amy M. Sneirson**  
AGAASIMAHA SARE

**Barbara Archer Hirsch**  
QAREENKA GOLAHA

## HEERARKA 2010 NAAFADA (ADA) EE NASHQADAHA LAGA HELI KARO MAINE Waa Maxay Farqiga Sharciga Gobalka Maine?

Xeerka Xuquuqda Aadanaha Maine, 5 M.R.S. §§ 4594-G (“MHRA”), iyo Heerarka 2010 Naafada (ADA) ee Nashqadaha La Heli Karo (“Heerarka 2010”) waxay leeyihiin **shuruudo isku mid ah, laga reebo:**

- 1) Hay’adda Dawada & Caafimaadka (MHRA) waxay leedahay micne kala duwan **“dhisid cusub”**:
  - Hay’adda Dawada & Caafimaadka (MHRA): Dhismayaasha loo dhisay dagidda koobaad ama badalidda haddii kharashka badaliddu yahay 75% ama kharash badan oo ah hagaajinta ee dhamaystirka dhisme.
  - Heerarka 2010: Dhismayaasha loo dhisay “dagidda koobaad.”
- 2) Hay’adda Dawada & Caafimaadka (MHRA) waxay u baahan **“shahaadada caqabad la’aanta”** ee qorshayaasha soo socda:
  - Haddii kharashaadka dhismaha ama badalidda ay yihiin ugu yaraan \$75,000,
  - Dhisaha dhisme waa inuu ka haystaa shahaado dhisme qaabeeye laysin leh, ingineer khabiir ah, nashqadeeye sharciyaysan ama qaabeeye dhul taasoo qorshayaashu waafaqayaan Heerarka 2010, ooy Gudbiyaan oo qorshayaasha lagu diro Kooxda Dab-damiska Gobalka iyo magaalada.
- 3) Hay’adda Dawada & Caafimaadka (MHRA) waxay u baahan **ogolaanshaha Kooxda Dab-damiska** ee qorshayaasha soo socda:
  - Haddii dhisidda cusub ee dhisme loo adeegsanayo dadwaynaha guud,
  - Magaaladu ma siin karto ogolaanshaha dhisme ilaa xafiiska Kooxda Dab-damiska ogolaado qorshaha oo uu cadeeyo in ay waafaqeen Heerarka 2010.
  - Haddii wax go’aan ah ayna ku bixin Kooxda Dab-damiska labo asbuuc gudahood, dhisuhu wuxuu soo gudbin karaa magaalada raacidda cadaynta qaabeeye ama ingineer si uu helo ogolaanshaha dhisme.
  - Waxaa daboolaya “dhismayaasha dadwayne” waxaa ku jira kuwa loo dhisay:
    - Gobal, dawladda hoose ama arrimo dagmo
    - Waxbarasho
    - Daryeel caafimaad, daryeelka xaafadda kalkaalinta guryaha ama dhisme kasta ay sharciyaysay Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka
    - Shirarka Dadwayne
    - Huteel, mooteel, huteel yar am guri looj
    - Maqaaxi
    - Ganacsi ama meel ganacsi oo ah in ka badan 3,000 fiit isku weer ama ka badan hal dabaq
- 4) Hay’adda Dawada & Caafimaadka (MHRA) waxay u baahan **baadhidda** magaalada ee dhismayaal dhamaystirmay sida soo socota:
  - Haddii ay tahay dhisid cusub ama badalid maqaaxi, mooteel, huteel ama huteel yar; gobal, dawlad hoose ama dhisme dagmo; ama dugsi hoose ama dhexe,
  - Kaasoo u baahday shahaado caqabad la’aan (fiiri xagga sare),
  - Haddii kalane magaaladu waxay baadhi dhismayaasha ee raacidda heerarka dhisme,
  - Ka dib Magaaladu waa inay baadhaa dhismaha dhamaystirmay ee raacidda qorshayaasha ay cadeeyeen Kooxda Dab-damiska ama khabiir nashqadayn ka hor intaan la siin ogolaansho daganaan.